



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 20, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Waalidiinta ah PWS iyo DSP

Waxaan dhawaan ku dhawaaqay [farriin](#) ah kala doorashada ku meel gaarka ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka si ay u noqdaan Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW). Kala doorashadani waa mid kaliya khuseysa inta lagu jiro Xaalada Caafimaad ee Degdega ah ee Bulshada (PHE) ee federaalka ee loogu talagalay cudurka baahsan ee COVID-19 mana noqon doonto isbeddel joogto ah.

Iyada oo ku xiran jawaab celinta daneeyaha, ODDS waxay cusbooneysiinaysaa xeerarkeeda si ay hay'adaha gaarka ah ugu oggolaato in ay shaqaaleysiiyaan waalidiin si ay u taageeraan carruurta yar yar inta lagu jiro PHE, haddii hay'adu doorato in ay sidaasi sameyso. Tani macnaheedu waa in waalidiinta dhashay carruur wax u qalanta ay noqon karaan PSW oo ku meel gaar ah ama Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP) oo ku meel gaar ah.

Si loo taageero qoysaska haysta carruur da'doodu ka yar yahay 18 jir ee leh baahida ugu badan ee la taaban karo, kala doorashadani waxay waalidiinta u oggolaanaysaa in ay si ku meel gaar ah taageerooyinka lacagtooda la qaato saacadii siiyaan carruurtooda iyaga oo ah PSW ama DSP. Waalidiinta leh carruur wax u qalantaa waxay hadda bilaabi karaan warqadooda isqorista.

Kala doorashadan waxaa heli doona carruurta qabta naafanimada maskaxda iyo/ama korriinka ee leh baahiyaha ugu badan ee dhanka taageerada oo la taaban karo. Gaar ahaan, kala doorashadani waxaa heli doona oo loogu talagalay waalidiinta carruurta:

- Buuxisa shuruudaha loogu talagay barnaamijka Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran (CIIS) oo ay ka mid yihiin barnaamiyada Caafimaad ahaan la Nugul yahay, Caafimaad ahaan Loogu lug leeyahay, iyo Hab-dhaqanka, iyo/ama;
- Looga baahan yahay 240 saacadood ama ka badan oo ah adeeg bixinta bishii taasi oo ku saleysan Qiimeynta Baahiyaha Carruurtooda (CNA) ee hadda jira.

Haddii uu ilmahaagu u qalmo barnaamijkan, Isku duwahaaga Adeegyada ayaa bixin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo noqdo PSW ama DSP. Waalid ah daryeel bixiye lacag qaadanaya ayaa looga baahnaan doonaa in uu dhammeystiro warqad oo buuxiyo shuruudaha aasaasiga ah oo la iskaga baahan yahay, sida ku gudbida baaritaanka taariikh dembiyeedka iyo raacida dhammaan xeerarka Oregon ee khuseeya. Intaasi waxaa dheer, in ay tani ku jiraan raacida tilmaamaha ODDS ee ku saabsan bixinta taageerada lacagteeda la bixiyo inta lagu jiro waxbarashada la kala joogo meel fog.

Waad ku mahadsan tihiin wax kasta oo aad u sameysid ilmahaaga.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Waad ku mahadsan tihiin wax kasta oo aad u sameysid ilmahaaga.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.